# Macluumaad
## ku saabsan xarunta qaabbilaadda qaxootiga



Xogta halkaan ku qoran waxa aad ka heleysaa macluumaad guud oo ku saabsan habka ay u shaqayso xarunta qaabilaadda qaxootiga, adeegyada laga helo xarunta qaabilaadda qaxootiga, iyo sidoo kale hagis iyo talooyin la xiriira sida aad uga hawlgali karto xarunta, iyo sida aad naftaada ugu daryeeli karto.

Waxa aad sidoo kale ka heli doontaa xarunta qaabilaadda qaxootiga iyo Hoggaanka socdaalka, macluumaadka iyo hagista kale ee ku khuseeya adiga. Macluumaadkaas waa kuwo adiga muhiim kuu ah, ee si taxaddar leh u akhri.

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

# Tusmada qoraalka

**Macluumaad ku saabsan hawlaha xarunta qaabilaadda qaxootiga**
Shaqaalaha xarunta qaabilaadda qaxootiga ayaa ku caawinaaya
Noqo qof firfircoon oo ka qaybqaado wax ka qabashada arrimahaaga
Had iyo goor cusbooneysii macluumaadkaaga xiriirka
Had iyo goor si wanaagsan uga dhaqan xarunta qaabilaadda dhex deeda
Sida loo bixiyo aragticelinta

**Hoyga ama degaanka xarunta qaabilaadda**
U hoggaansanow oo raac xeerarka dadka ka dhexeeya ee ku saabsan arrimaha degaanka
Degitaanka hoyga gaarka ama baraayfadka ah
U wareegista xarun kale oo qaabilaadda qaxootiga ah

**Macluumaad ku saabsan adeegyada xarunta qaabilaadda qaxootiga**
Hagis iyo talo guud
Adeegyada arrimaha bulshada
Adeegyada daryeelka caafimaadka
Kharashka la iska qaado ee adeegyada qaabilaadda
Lacagta qaabilaadda (Vastaanottoraha)
Kaarka lacag bixinta
Kooraska ku saabsan bulshada Finland
Xafiiska shaqada iyo hawlaha waxbarashada
Turjumista
Taageerada dib u noqoshada ikhtiyaariga ah
Xarunta qaabilaadda waxaa ay falanqaynaysaa xogtaada
U guurista degmada

**Hagista iyo talooyinka ku saabsan sida looga dhaqmo xarunta qaabilaadda dhexdeeda iyo sida naftaada loo daryeelo**
Dano ka dhammaysashada xarunta qaabilaadda
Sida wax loo qabanaayo marka ay jirto xaalad degdeg ah
U sheeg xarunta qaabilaadda marka aad maqnaanayso iyo marka aad ka baxayso xarunta qaabilaadda
Carruurta iyo qoysaska carruurta leh
Horumarinta kartidaada, is maamulistaada iyo nololwanaaggaaga guud
Waxbarasho ka baxsan xarunta qaabilaadda
Shaqaysashada
Hiwaayadaha
Qorshaynta dhaqaalaha

**Macluumaad dheeraad ah**

# Macluumaad ku saabsan hawlaha xarunta qaabi-laadda qaxootiga

## Shaqaalaha xarunta qaabilaadda qaxootiga ayaa ku caawinaaya

Xarunta qaabilaadda qaxootiga waxaa ka shaqeeya shaqaale khaas u ah adeegyada arrimaha bulshada, adeegyada caafimaadka, hagista iyo talosiinta.

Shaqaalaha xarunta qaabilaadda qaxootiga waxaa ay meesha u joogaan waa adiga dartaa, si ay kuu caawiyaan. Had iyo goor waad waydiin kartaa haddii aad u baahan tahay caawimaad ama haddii ay jiraan wax aad fahmi la'dahay.

Shaqaalaha xarunta qaabilaadda waxaa ay hawshooda u gudanayaan si dhexdhexaad ah, waxaana ay dadka macaamiisha ah ula dhaqmayaan si siman oo iskumid ah.

Shaqaalaha xarunta qaabilaadda ma gaaraan go'aammada la xiriira sharciga degganaanshaha dalka, wax saamayn ahna kuma yeelan karaan go'aammada la xiriira sharciga degganaanshaha dalka iyo go'aammada magangelyoddoonista. Go'aammada oggolaanshaha arrinkaas waxa gaara Hoggaanka socdaalka.

Mar walba u hoggaansan hagista iyo tilmaanbixinta ay ku siinayaan shaqaalaha xarunta qaabilaadda.



# Noqo qof firfircoon oo ka qaybqaado wax ka qabashada arrimahaaga

Ka qaybqaado daryeelka arrimahaaga adigoo kaashanaaya kartidaada iyo awooddaada. Ujeeddadu waa in aad si madaxbannaan ugu dadaasho wax ka qabashada arrimahaaga.

Had iyo goor iskaashi wanaagsan la samee shaqaalaha xarunta qaabilaadda.

# Had iyo goor cusbooneysii macluumaadkaaga xiriirka

Hubi in xarunta qaabilaadda ay marwalba haysato macluumaadkaaga xiriirka ee saxda ah (lambarka telefoonka, cinwaanka iyo iimeylka), si ay shaqaaluhu kuula soo xiriiri karaan markii loo baahdo.

# Had iyo goor si wanaagsan uga dhaqan xarunta qaabilaadda dhexdeeda

Xarunta qaabilaadda waa in ay noqotaa meel ammaan u ah dhammaan dadka halkaas ku nool iyo kuwa ka shaqeeya.

- Ixtiraam dadka kale ee macaamiisha ah, shaqaalaha xarunta iyo hantida xarunta.

Xarunta qaabilaadda waxaa ay leedahay xeerar ay waajib tahay in aad raacdo ama u hoggaansanto. Nooc kasta oo ah habdhaan ku salaysan xoogmuquunis ama qashqashaad ah, waa ka mamnuuc xaraunta qaabilaadda dhexdeeda. Haddii aad aragto wax xoogmuquunin ah ama wax kale oo qashqashaad ah oo ka dhacaaya xarunta qaabilaadda, u sheeg shaqaalaha xarunta.

Qaar ka mid ah goobaha guud ee xarunta qaabilaadda waxaa laga yaabaa in ay leeyihiin kaamaradda ilaalinta amniga. Laakiin lama duubaayo qolkaaga, musqulaha ama meelaha qubayska.



Waxa aad xarunta qaabilaadda siin kartaa aragticelin.




# Sida loo bixiyo aragticelinta

U sheeg shaqaalaha xarunta qaabilaadda haddii aad ku qanacsan tahay adeegyada, haddii ay jiraan wax ku dhibaaya ama haddii aad doonayso in aad wax talo ah soo jeediso. Aragticelinta aad bixiso waxaa ay xarunta qaabilaadda iyo Hoggaanka socdaalka ka cawinaysaa, sidii ay u qiimayn lahayeen islamarkaana ay u horumarin lahaayeen waxqabadkooda.

Sidoo kale waxaa aad dacwo ama cabasho dhanka maamulka ah u gudbin kartaa Hoggaanka socdaalka, haddii aad u malaynayso in xarunta qaabilaadda ama shaqaalaheedu ay u dhaqmeen si khalddan oo sharciga ka soo horjeedda ama aysan ka soo bixin waajibaadkoodii saarnaa. Kahor inta aadan cabashada gudbin, kala hadal arrinka haddii ay suurtaggal tahay, ugu horrayn xarunta qaabilaadda ama shaqaalaha. Haddii uu khalad dhacay, wadahadal kaddib ayaa arrinka si dhakhso leh wax looga qaban karaa.

Hagista ku saabsan sida loo sameeyo cabashada, waxaa laga helaa bogga internetka ee Hoggaanka socdaalka. Haddii aad u baahato caawimaad ku saabsan diyaarinta dacwada ama cabashada, waxa aad ka heleysaa xarunta qaabilaadda.



# Hoyga ama degaanka xarunta qaabilaadda

Hoyga xarunta qaabilaadda waa mid dadku ay wadaagaan. Xarunta qaabilaadda waxaa ay kuu diyaarin doontaa qol ama guri aad la wadaagayso dadka kale ee macaamiisha ah. Waxaa dhici karta in lagaa beddelo qolkaaga ama guriga aad degan tahay inta aad joogto xarunta qaabilaadda.



# U hoggaansanow oo raac xeerarka dadka ka dhexeeya ee ku saabsan arrimaha degaanka

Xarunta qaabilaadda waxaa ku nool dad badan oo ka soo jeeda jinsiyado, dhaqammo iyo asal kala duwan. Degaanku waxaa uu leeyahay xeerar ama sharciyo, ay waajib tahay in dhammaan dadka xarunta deggan ay u hoggaansamaan. Ixtiraam diinta, dhaqanka iyo caadooyinka dadka kale ee kula deggan xarunta qaabilaadda.

- Qof walba wuxuu xaq u leeyahay aqoonsiga iyo ku dhaqanka diinta, xaqa ah in uu muujiyo waxa uu aaminsan yahay, iyo inuu ku biiri karo ama ka baxi karo koox ama bulsho diimeed. Si kastaba ha ahaatee, ha ku gudan ama ha ku samayn arrimaha la xiriira diintaada meelaha guud ee dadka ka dhexeeya ee ku yaalla xarunta qaabilaadda, si aanay u dhibin dadka kale.
- Xarunta qaabilaadda dhexdeeda laguma keydsan karo ama laguma isticmaali karo wax hub ama maandooriye ah. Isticmaalka iyo haysashada maandooriyaha waa arrin sharcidarro ka ah Finland gudaheeda. Haddii aad haysato qalab waxyeello u geysan kara dadka ama deegaanka, waa lagaa qaadi karaa.
- Saabaanka ama qalabka guryaha iyo waxyaabaha kale ee qolka ku diyaarsan waa hanti ay leedahay xerada qaabilaadda qaxootiga. Qalabkaas lama iibin karo, lama beddeli karo, lama fujin karo, meeshana lagama saari karo. U sheeg shaqaalaha xarunta qaabilaadda, haddii ay jabaan saabaanka ama qalabka guriga yaalla ee qolkaaga ama gurigaaga. Haddii aad doonayso in aad alaab adiga kuu gaar ah keento xarunta qaabilaadda, waxaad ku keeni kartaa oo keliya oggolaanshaha shaqaalaha xarunta.
- Raac oo u hoggaansan jadwalka lagu heshiiyay ee xarunta qaabilaadda iyo dadka aad qolka wada deggan tihiin, tusaale ahaan cunto karinta, dhar dhiqista iyo habdhaqanka la xiriira dhammaan goobaha kale ee dadka ka dhexeeya.



- Sigaar ha ku cabbin gudaha xarunta. Sigaarka waxaa lagu cabbi karaa oo keliya goobaha loogu talaggalay sigaar cabista ee ku yaalla bannaanka xarunta.
- Ka taxaddar ammaanka ilaalinta dab kicidda. Ilaali isticmaalka qalabka korontada. Shaqaalaha xarunta weydiiso caawimaad, haddii qalabka ama korontadu aanay shaqynaynin. Ha ku kaydin ama ha dhigin wax alaab ah, shooladda ama makiinadda cuntada dusheeda.
- Xarunta qaabilaadda waxaad ka heleysaa si aad u isticmaasho agabka ay ka midka yihiin gogosha sariirta, qalabka nadaafadda iyo waraaqaha musqusha. xil iska saar oo ka qaybqaado nadaafadda guriga ama tan qolka. Mar walba nadiifi meel kasta oo aad isticmaasho, tusaale ahaan marka aad jikada cuntada ku karsato kaddib. Qashinka waxaad gaysaa meelaha loogu talaggalay.
- Biyaha waxaad u isticmaashaa si beekhaamin ama dhaqaalayn ah. Soo gaabi wakhtiga qubayska, tuubada qubayska xir inta aad saabuunta ismarinayso, sidoo kale waxaad isticmaashaa biyo heerkulkoodu yahay mid habboon.
- Ka taxaddar oo ilaali furayaasha guriga iyo kuwa qolka.
- Xilliga aamusnaanta iyo degganaanta, sida badan waa inta u dhexeysa 22.00–07.00, waa mamnuuc oo lama oggola hadal cod dheer ah, muusig ama qaylo kale oo dhib ku ah dadka kale ee deggan guriga.
- Martidu ma seexan karaan habeenkii gudaha xarunta qaabilaadda.
- Shaqaalaha xarunta qaabilaadda waxaa ay si joogto ah ama marka loo baahdo u hubin karaan xaaladda qolka ama guriga.



# Degitaanka hoyga gaarka ama baraayfadka ah

Adiga ayaa si iskaa ah u diyaarsan kara degaanka gaarka ama baraayfadka ah ee ka baxsan xarunta qaabilaadda. Arrinkaan waxaa la yiraahdaa hoyga gaarka ama baraayfadka ah (yksityismajoitus). Waxaad ku noolaan kartaa tusaale ahaan guriga qaraabadaada, ninkaaga/ xaaskaaga ama saaxiibkaa. Waxa kale oo aad kireysan kartaa guri adiga kuu gaar ah ama waxaad ku noolaan kartaa guri aad qayb ka ijaaratay (alivuokralaisena).

**Marka aad ku nooshahay hoyga gaarka ama baraayfadka ah, fadlan fiiro gaar ah u yeelo arrimahan soo socda:**

- Hoygaagu waa in uu ahaadaa meel loogu talaggalay degaan ama nolol, islamarkaana laguugu soo diri karo waraaqaha dhanka boostada ah.
- Waa in aad degganaataa cinwaanka aad sheegtay.
- Samee wargelinta ama ogaysiinta beddelka cinwaanka (muuttoilmoitus), waxaadna ka samaysaa xafiiska boostada marka aad u guurto cinwaanka cusub.
- Qaab qoraal ahaan ah ugu soo sheeg xarunta qaabilaadda, cinwaanka hoyga aad adiga sida ikhtiyaarkaaga ah u diyaarsatay. Sidoo kale u soo sheeg marwalba wixii isbeddel ah ee arrimahaaga ku yimaada.
    - Tani waa muhiim, si aad u sii haysato xuquuqda adeegyada kale ee xarunta qaabilaadda, iyo sidoo kale si Hoggaanka socdaalka ay kaala soo xiriiraan arrimaha la xiriira codsigaaga.

# U wareegista xarun kale oo qaabilaadda qaxootiga ah

In aad macmiil ka ahaato xarunta qaabilaadda qaxootiga waa xaalad kummeelgaar ah. Mar walbana khasab ma ahan in aad ku noolaatid isla xaruntaas muddada aad macmiilka ka tahay xerada qaabilaadda.

Fursadda ama suurtaggalnimada ah in aad joogto ama laguu wareejiyo xarun kale oo qaabilaadda, waxaa ay ku xiran tahay hadba sida uu boosku uga bannaan yahay xarunta qaabilaadda. Mararka qaar wax boos ah kama bannaana degmada ama magaalada aad doonayso in aad degto. Sidaas darteed adigu ma dooran kartid xarunta aad doonayso in aad ku noolaato


Waxaa laguu wareejin karaa xarun kale, haddii ay jiraan arrimo lagammamaarmaan u ah xaaladdaada, shaqada xarunta qaabilaadda ama hay'adaha dowladda, ama habka loo maamulo codsigaaga awgood. Sidoo kale waxaa laguu wareejin karaa xarun kale oo qaabilaadda ah, haddii la xiro xaruntaada qaabilaadda ee aad hadda joogto, ama haddii markii hore lagu dejiyey xarun kummeelgaar ah oo loogu talaggalay dadka cusub ee dalka soo galaya (transit-keskus).

**Sidoo kale, adiga laftigaaga waad ka codsan kartaa xaruntaada qaabilaadda in laguu uwareejiyo xarun kale haddii:**

- aad shaqo ka heshay magaalo kale,
- aad boos waxbarasho ka hesho magaalo kale, tasoo aad ku heleyso shahaado xirfadeed ama
- qof ka tirsan qoyskaaga kuu dhow uu ku nool yahay xarun kale oo qaabilaadda ah. Dadka qoyskaaga kuu dhow ah waxaa ka mid ah aabbo, hooyo, xaas ama nin, ama ilmo aan qaangaarin.

Xarunta qaabilaadda ayaa masuul ka ah dhammaan hawlaha iyo qabanqaabada ku saabsan u wareegista goobta kale.





# Macluumaad ku saabsan adeegyada xarunta qaabilaadda qaxootiga

Xarunta qaabilaadda qaxootiga ayaa adiga kuu diyaarinaysa adeegyada xarunta qaabilaadda. Sharcigu wuxuu qeexayaa noocyada adeegyada ee aad xaqa u leedahay.

**Adeegyada xarunta qaabilaadda qaxootiga waxaa ka mid ah:**

- hoyga ama degaanka
- adeegyada arrimaha bulshada
- adeegyada daryeelka caafimaadka
- lacagta xarunta qaabilaadda
- hawlaha waxbarashada iyo shaqada
- turjumis iyo
- taageerada dib u noqoshada ikhtiyaariga ah (vapaaehtoisen paluun tuki).

**Intaas waxaa dheer, xarunta qaabilaadda qaxootiga waxaad ka heleysaa macluumaad ku saabsan:**


- xuquuqaha iyo waajibaadka la xiriira in aad tahay macmiilka xarunta qaabilaadda qaxootiga
- xeerarka xarunta qaabilaadda qaxootiga
- warbixin ku saabsan bulshada Finishka ah.

Sidoo kale, xarunta qaabilaadda waxaa ay ku siinaysaa talo iyo hagis ku saabsan hawlaha la xiriira nololmaalmeedka.

Haddii aad ku nooshahay hoy gaar ama baraayfad ah, kharashaadka ka dhasha arrimaha hoyga sida kirada, korontada iyo biyaha laguuma magdhabi doono. Hoyga iyo kharashaadkiisana taageero dhaqaale laguma bixiyo.

## Hagis iyo talo guud

Hagayaasha xarunta qaabilaadda qaxootiga waxaad ka heleysaa talooyin iyo hagis ku saabsan xaaladaha kala duwan ee la xiriira hawlaha nololmaalmeedka, iyo su’aalaha ku saabsan hoyga ama degaanka xarunta qaabilaadda qaxootiga.





## Adeegyada arrimaha bulshada

**Waxaad ka heli kartaa shaqaalaha arrimaha bulshada ama hagaha bulshada ee xarunta qaabilaadda qaxootiga, talooyin, hagis iyo taageerada ku saabsan arrimaha soo socda:**

- korinta iyo tarbiyadda carruurta iyo dhallinyarada, iyo arrimaha waalidnimada
- waxbarashada iyo iskuul dhigashada
- daryeelka caafimaadkaaga maskax iyo jir ahaaneed, iyo sidii aad u ilaalin lahayd caafimaadkaaga guud
- maareynta nolosha iyo sidii aad si madaxbannaan ugu noolaan lahayd
- dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda,ama dhibaatooyinka maandooriyaha
- baahiyaha gaarka ah ee ka dhasha ama uu keeno gabowga
- baahiyaha gaarka ah oo ka dhasha naafonnimada

Haddii aad u baahan tahay caawimaad, la xiriir shaqaalaha adeegyada bulshada ee xarunta qaabilaadda qaxootiga.

## Adeegyada daryeelka caafimaadka

Kalkaalisada caafimaadka iyo fayadhowraha (terveydenhoitaja) xarunta qaabilaadda qaxootiga, ayaa ka mas'uul ah in ay kuu diyaariyaan adeegyada daryeelka caafimaadka.

Kalkaalisada xarunta qaabilaadda qaxootiga waxaa ay qiimaynaysaa baahidaada daryeelka caafimaadka, waxayna ku siinaysaa daryeel, sidoo kale waxaa ay kuu gudbin kartaa adeegyada caafimaadka ee ka baxsan xarunta haddii arrinkaas loo baahdo.

Marka ugu horraysa ee aad timaaddo xarunta qaabilaadda qaxootiga, waxaa lagugu samaynayaa baaritaanka caafimaadka ee bilowga ah, kaasoo ah mid ikhtiyaari ah. Baaritaankaan waxaa lagu ogaanayaa xaaladdaada caafimaad iyo adeegyada caafimaad ee laga yaabo in aad u baahato. Marka aad imaanayso baaritaanka caafimaadka, waxaa aad horey u soo qaadataa dukumintiyada caafimaadka ee aad wadato, ama u sheeg kalkaalisada caafimaadka wixii xog caafimaad ah ee arrinkaaga la xiriirta. Kalkaalisadu waxaa ay kuu gudbin kartaa ama ay kuu diri kartaa baaritaanno dheeraad ah, tusaale ahaan baaritaannada dhanka shaybaarka ee cudurrada faafa qaarkood.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad, la xiriir shaqaalaha adeegyada daryeelka caafimaadka ee xarunta qaabilaadda qaxootiga.

# Kharashka la iska qaado ee adeegyada qaabilaadda

Haddii aad ku nooshahay xarunta qaabilaadda qaxootiga islamarkaana aad shaqo mushahar leh ka shaqeyso, waxaa lagaa qaadi karaa kharashka ku baxaaya adeegyada qaabilaadda. Sidoo kale, waxaa kharashka lagaa qaadi karaa haddii aad leedahay hanti kale. U sheeg xarunta qaabilaadda qaxootiga haddii aad shaqayso ama aad haysato hanti kale oo aad isticmaalayso.



---

# Lacagta qaabilaadda (Vastaanottoraha)

Waxaad heli kartaa lacagta qaabilaadda qaxootiga haddii dakhliga ama hantida adiga ama qofka xubnaha qoyskaaga ah uusan ku filnayn kharashaadka maalinlaha ah ee arrimaha lagammamaarmaanka ah, sida cuntada iyo dharka. Waxaad lacagta ka codsan kartaa xarunta qaabilaadda qaxootiga.

Lacagta qaabilaadda waxaa loogu talaggalay daboolidda baahiyahaaga aasaasiga ah ee lagammamaarmaanka ah.

Lacagta qaabilaadda si toos ama ootomaatig ah la isuma siiyo, ee waa in aad codsato. Marka aad codsanayso waa in aad xarunta qaabilaadda u sheegtaa dakhligaaga iyo hantida aad haysato. Sidoo kale, dhammaan dakhliga ama hantida aad ka hesho dibadda ayaa saameyn ku yeelanaysa qaddarka ay dhan tahay lacagta qaabilaadda ee laguu qoondeynaayo, haddii aad ku isticmaalayso Finland gudaheeda.

Lacagta qaabilaaddu waxaa ay u qaybsantaa labo nooc oo kala ah, qaybta aasaasiga ah (perusosa) iyo qaybta dhammaystirka ah (täydentävä vastaanottoraha). Qaybta aasaasiga ah ee lacagta qaabilaadda waxaa loogu talaggalay tusaale ahaan, dharka, kharashaadka yar ee daryeelka caafimaadka, tigidka baska ama gaadiidka ee magaalada gudaheeda ah, iyo kharashaadka ka dhasha isticmaalka telefoonka

Sidoo kale qaybta aasaasiga ah ee lacagta qaabilaadda waxaa loogu talaggalay kharashyada ku baxa cuntada, haddii xarunta qaabilaaddu aanay bixin ama dadka siin cuntada diyaarka ah.

Qaybta aasaasiga ah ee lacagata qaabilaadda ka sokow, waxa aad codsan kartaa qaybta dhammaystirka ee lacagta qaabilaadda (täydentävää vastaanottorahaa) ee loogu talaggalay baahiyaha kala duwan, tusaale ahaan waxbarashada xarunta qaabilaadda bannaankeeda ah, ama qalabka iyo agabka loogu talaggalay ilmaha yar. Sidaas darteed, lacagta qaabilaaddu waxaa ay ku xiran tahay hadba sida ay tahay xaaladdaada dhaqaale iyo baahiyahaaga, waxaana lagugu siinayaa oo keliya haddii aad si dhab ah ugu baahan tahay.



# Kaarka lacag bixinta

Lacagta qaabilaadda iyo mushaarka suurtaggalka ah ee aad ka hesho shaqada mushaarka leh, waxaa lagu soo shubaa kaarka Hoggaanka socdaalka ee sida gaarka ah loogu talaggalay lacag bixinta ama akoon bangi oo dalkaan Finland ah. Lacagta qaabilaadda ee qoyska oo dhan waxaa lagu shubaa hal kaar. Kaarka lacag bixinta ee Hoggaanka socdaalka wuxuu ku shaqeynayaa oo keliya gudaha dalkan Finland. Xarunta qaabilaadda ayaa ku siinaysa tilmaanbixin iyo hagis ku saabsan sida kaarka loo isticmaalo.



---



# Xafiiska shaqada iyo hawlaha waxbarashada

Xarunta qaabilaadda waxaa ay u diyaarisaa macaamiisha deggan xerada qaabilaadda hawlo shaqo iyo waxbarasho. Haddii aad diiddo ama aad dayacdo ka qaybgalka shaqada iyo waxbarashada, waxaa arrinkaa uu kugu keeni karaa ama sabab u noqon karaa, in lagaa jaro qayb ka mid ah lacagta qaabilaadda.

Hawlaha waxbarashada waxaa ay ku baxayaan luqaddaha af-finishka ama af-iswidhishka. Hawlaha shaqada ee la qabtaa waxaa ay si gaar ah u khuseeyaan nadiifinta iyo hagaajinta qolalka la deggan yahay iyo ilaalinta nadaafadda guud.

---

# Kooraska ku saabsan bulshada Finland

Xarunta qaabilaadda waxaa ay kuu diyaarinaysaa koorsada ku saabsan bulshada Finland. Koorsadan waxaa ay ku siinaysaa macluumaad aasaasi ah oo muhiim ah oo ku saabsan bulshada Finland, sharciga iyo nidaamka dalka, taariikhda, dhaqanka iyo caadooyinka Finland.

Koorsadu waxaa ay ka kooban tahay, qalab waxbarasho oo si iskaa ah wax  loogu barto, iyo koorsada dhanka internetka ah (verkkokurssi).

Waxaa dhamaan dadka ku jira xarunta qaabilaadda laga sugayaa in ay qaataan oo ay dhammeeyaan koorsadaan.



# Turjumista

Shaqaalaha xarunta qaabilaadda waxaa ay kuu qaban karaan turjubaan marka lagu guda jiro xaaladaha la xiriira arrimaha muhiimka ah ee adiga kugu saabsan.

Turjubaanka badanaa waxaa loo adeegsadaa tusaale ahaan, kulammada lala yeelanaayo shaqaalaha arrimaha bulshada ama sooshalka hagaha ah, iyo marka dhakhtarka lala kulmaayo. Turjubaanka mar walba laguuguma qabanaayo luqadda afkaaga hooyo, haddii aad si fiican u fahmi karto luqad kale oo aad taqaan.

Arrimaha maalinlaha ah ee xarunta qaabilaadda waxaa la isku dayaa in la xalliyo iyadoo aan turjubaan la adeegsan.




Turjubaannadu waxaa saaran waajibka ah in ay qariyaan ama ilaaliyaan sirta qofka (salassapitovelvollisuus), taas oo macnaheedu yahay in aysan cid kale u gudbin karin wixii xog ah ee aad sheegto.

---

# Taageerada dib u noqoshada ikhtiyaariga ah



Xarunta qaabilaadda qaxootiga waxaa ay si joogto ah u bixinaysaa macluumaadka ku saabsan dib u noqoshada ikhtiyaariga ah ee la taageeraayo iyo talosiinta ku saabsan dib u noqoshada. Dib u noqoshada ikhtiyraagiha ee la taageeraayo waxaa loola jeedaa caawimaad iyo taageero la siinaayo haddii uu qofku si ikhtiyaari ah dib ugu noqonaayo dalkiisa hooyo. Haddii aad doonayso in aad maqasho ama hesho faahfaahin ku saabsan dib u noqoshada ikhtiyaariga ah ee la taageeraayo, waxa aad la xiriirtaa shaqaalaha xarunta qaabilaadda qaxootiga.

# Xarunta qaabilaadda waxaa ay falanqaynaysaa xogtaada

Falanqaynta xogta shakhsiyadeed waa mid la xiriirta hawlaha ku salaysan arrimaha sharciga ee xarunta qaabilaadda qaxootiga. Xaruntu waxaa ay xogtaada u falanqaynaysaa si ku salaysan sharciga iyo kalsooni.

Xogtaada waxaa lala wadaagi karaa oo keliya hay'adaha uu sharcigu xaqa u siinaayo arrinka ah falanqaynta xogta, ama haddii aad adigu siisay oggolaanshaha ku saabsan falanqaynta xogta.

Haddii laguu wareejiyo xarun kale, xogtaada si toos ah ayaa xaruntaas loogu wareejinayaa.



Waxaad xaq u leedahay in aad codsato helitaanka dhammaan qoraallada iyo xogta adiga kugu saabsan.

---



## U guurista degmada

Haddii aad hesho sharciga degganaanshaha dalka (oleskelulupa) iyo xaqa ah in aad codsan karto degmada aad degayso (kotikunta), waxaa lagaa sugayaa  in aad codsato degaanka magaalada aad ku noolaanayso, iyo sidoo kale in aad ka baxdo macmiilnimada xarunta qaabilaadda qaxootiga.

Shaqaalaha xarunta qaabilaadda ayaa kaa caawin doona hagista ku saabsan u guurista degmada iyo caawimaadda ku saabsan sidii aad ku heli lahayd guri adiga kuu gaar ah.

# Hagista iyo talooyinka ku saabsan sida looga dhaqmo xarunta qaabilaadda dhexdeeda iyo sida naftaada loo daryeelo



## Dano ka dhammaysashada xarunta qaabilaadda

Hubi saacadaha uu furan yahay xafiiska xarunta qaabilaadda qaxootiga iyo meelaha lagala xiriiri karo shaqaalaha, iyo qaabka la xiriirka xaruntaada qaabilaadda.

Shaqaalaha xarunta qaabilaadda ayaa kuu sheegaaya sida aad ballan uga qabsan karto arrimaha adeegyada bulshada iyo caafimaadka ee xarunta qaabilaadda, iyo sida adeegyadaas arrimahaaga looga dhammaysan karo.

Had iyo goor wakhtigii loogu talaggalay ku imoow ballanka laguu qabtay. Haddii aadan tagi karin ballanka, sida ugu dhakhsaha badan ugu sheeg qofkii aad la ballansanayd. Haddii xarunta qaabilaadda ay kuu qabato ballan ka baxsan xerada qaxootiga ee ah hay'adaha bixiya adeegyada daryeelka caafimaadka, tusaale ahaan ballanka dhakhtarka, waa in aad ku tagtaa wakhtigii laguu qabtay oo aadan ka daahin. Had iyo goor sida ugu dhakhsaha badan ugu soo sheeg xarunta qaabilaadda, haddii aadan tagi karin ballanka laguu qabtay.

Qaar ka mid ah xarumaha qaabilaadda waxaa ay leeyihiin shaqaale heegan ah (päivystäjä) oo si gaar ah u jooga fiidkii iyo habeenkii, kuwaasoo aad kala xiriiri karto arrimaha degdegga ah. Qofka heeganka ku jira wuxuu kaa caawin karaa dhibaatooyinka degdegga ah, sida: in uu albaabka kuu furo, haddii aad furaha gudaha iskaga soo xirto, ama haddii guriga ay cilad halis ah ka dhacdo. Arrimaha aan degdegga ahayn waxaa ka mid ah tusaale ahaan, hagaajinta gacanta albaabka (ovenkahva) ama beddelidda nalka, arrimahaas ma ahan kuwo degdeg ah oo ay tahay in qofka heeganka ku jiraa uu habeenkii qabto, waxa aad la sugaysaa maalinnimada caadiga ah.


# Sida wax loo qabanaayo marka ay jirto xaalad degdeg ah

Shaqaalaha ayaad ka heleysaa macluumaadka ku saabsan, sida wax loo qabanaayo haddii uu dab kaco ama xaalad kale oo dgedeg ah ay timaaddo. Haddii qalabka dab ka digista uu dhawaaqo, hubi in qof kale uusan qolka ku jirin, albaabka xir oo ka bax dhismaha.

Haddii noloshaada, caafimaadkaaga ama amnigaaga uu khatar ku jiro, waxaad si toos ah u wacdaa xarunta emerjensiga ama arrimaha degdegga ah: 112. Lambarka guud ee emerjensiga 112 (ambalaasta, dabdamiska iyo booliska), waxaa loogu talaggalay oo keliya xaaladaha ay jiraan arrimaha emerjensiga ama degdegga ah.

Haddii aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah, islamarkaana aadan heli karin la xiriirka xaruntaada qaabilaadda, wac lambarka caawimaadda heeganka ee ah 116117. Inta lagu guda jiro caawimaadda heeganka, xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ayaa kuugu shegaaya luqadaha af-finishka, af-iswidhishka ama af-ingiriiska, arrinka ah in xaaladdaadu ay tahay mid u baahan heeganka iyo inkale. Telefoonku waa bilaash ama lacag la'aan.

Xarunta emerjensiga ama arrimaha degdegga ah: 112
Caawimaadda heeganka ee ah 116117



# U sheeg xarunta qaabilaadda marka aad maqnaanayso iyo marka aad ka baxayso xarunta qaabilaadda

Waxaa jira xilliyo go'an oo ay xarunta qaabilaadu hubiso in aad weli joogto Finland oo aad u baahan tahay adeegga xarunta qaabilaadda iyo inkale. Haddii ay xarunta qaabilaadda ku weydo marka ay kula soo xiriirto, waa lagaa joojinayaa adeegyada xarunta qaabilaadda, waxaana dhici karta in macmiilnimadaadii xarunta qaabilaadda la joojiyo. Haddii aad doonayso in aad si joogto ah uga baxdo Finland, waa in aad arrinkaas u sheegtaa xarunta qaabilaadda. Ogaysiinta waa in la sameeyaa, xittaa haddii aad degaysid xarunta qaabilaadda bannaankeeda.

Haddii aad si joogto ah uga baxdo Finland, waxaa kugu waajib ah in aad baajiso ama kansasho, codsigaaga badbaadada kummeelgaarka ah ama sharcigaaga degganaanshaha dalka ama codsigaaga ku saabsan magalgelyoddoonista.

Waa in aadan ka bixin Finland, haddii falanqaynta codsigaaga magangelyoddoonista uu dhexda maraayo. Haddii aad ka baxdo Finland, codsigaaga magangelyoddoonista waa uu burayaa, taasoo loola jeedo waxaa dhammaanaya ama joogsanaya falanqaynta iyo go'aan ka gaarista codsigaaga.



# Carruurta iyo qoysaska carruurta leh

Waalidiinta waxaa waajib ku ah in ay carruurtooda ku koriyaan ayna ku daryeelaan, xittaa xarunta qaabilaadda dhexdeeda.

Finland waa mamnuuc in ilmaha lagu sameeyo dhammaan noocyada ciqaabta jir ahaaneed.

Goobaha ciyaarta ee guriga bannaankiisa iyo goobaha ciyaarta carruurta ee guud, waa kuwo si ikhtiyaari ah loo isticmaali karo, iyadoo aan wax kharash ah laga bixinaynin. Carruurta yaryar keligood loogama tagi karo guriga dhexdiisa ama bannaanka guriga,  iyadoo aanay dad waaweyn la joogin oo aanay ilaalinaynin.

Waxaad ilmaha u codsan kartaa booska xanaanada, taasoo loola jeedo goobta xannaanada carruurta ee degmada, haddii aad shaqayso ama waxbarasho maalinka oo dhan ah aad ku jirto, ama haddii ilmuhu uu yahay mid leh baahiyaha gaarka ah.

Ilmaha 6-sano jirka ah wuxuu xaq u leeyahay waxbarashada hore (esiopetus), carruurta da'doodu u dhexeyso 7-17 sano jir, waxaa ay xaq u leeyihiin waxbarashada aasaasiga. Carruurta ay waajibka ku tahay waxbarashada (da'da 7–17 sano) waa in haddii ay suurtaggal tahay, ay ka qaybqaataan waxbarashada hordhaca ah ee diyaarinta(valmistava opetus) ama waxbarashada aasaasiga ah (perusopetus). Waa muhiim in ilmahaagu waxbarasho helo. Ujeeddaduna waa in dhammaan carruurta ku nool Finland ay dhigtaan iskuulka.

Shaqaalaha xarunta qaabilaadda ayaa ka caawinaya qoysaska, buuxinta iyo gudbinta foomamka codsiyada xannaanada carruurta (varhaiskasvatus) iyo codsiyada iskuulka.



# Horumarinta kartidaada, is maamulistaada iyo nololwanaaggaaga guud

Waxaad adigu sameyn kartaa waxyaabo badan oo horumarinaaya kartidaada waxqabad, ismaamulistaada iyo nololwanaaggaaga. Waxaad ku socon kartaa oo joogi kartaa xarunta qaabilaadda bannaankeeda. Barashada deegaanka kugu hareeraysan, firfircoonida iyo qabashada waxyaabo faa'iido leh, waxaa ay xoojiyaan hanashada noloshaada iyo nololwanaaggaaga.

Waxbarashada, shaqada iyo hiwaayadaha waxaa ay kaa caawinayaan in aad barato wax cusub, waxayna ku siinayaan hawl maalmeed qiimo leh. In aad tagto shaqo mushahar leh waxaa ay sidoo kale  ku siinaysaa fursadda ah in aad naftaada dhaqaale ahaan u daryeesho.

- Baro deegaanka ku hareereysan xarunta qaabilaadda.
- La xiriirka dadka kale waxaa uu wanaajinayaa maskaxdaada.
- Ku dadaal nolol caafimaad leh (cunto, hurdo iyo jimicsi).
- SI fiican oo kugu filan u seexo, kuna dadaal inaad yeelato nidaam hurdo oo isku dheelitiran oo joogto ah.
- Si joogto ah u jimicso ama u soco
- Cun cunto kala duwan oo caafimaad leh, cab biyo kugu filan maalin kasta.
- U labbiso si waafaqsan cimillada.
- Gacmaha ku dhaq saabuun marka aad xarunta timaaddo, suuliga ama musqusha kaddib iyo kahor cuntada.
- Qorshee isticmaalka lacagtaada.
- Ka qaybgal hawlaha iyo waxqabadka ururrada.





# Waxbarasho ka baxsan xarunta qaabilaadda

Haddii aad doonayso in aad wax ka barato xarunta qaabilaadda bannaankeeda, arrinkaas waa suurtaggal. Waxaad codsan kartaa boos waxbarasho, waadna aqbali kartaa, haddii ay jaamacadda ama iskuulku oggolaadaan, iyadoo la raacaayo sharciyadooda iyo xeerarkooda.

Caadi ahaan xaq uma lihid taageerada la siiyo ardayda dalkaan Finland, sida lacagta taageerada waxbarashada (opintotuki). Haddii loo baahdo, waxaad codsan kartaa lacagta dhammaystiran ee qaabilaadda (täydentävä vastaanottoraha), ee taagerada waxbarashada.

Helitaanka boos waxbarasho macnaheedu ma aha in aad xaq u leedahay in aad Finland joogto.



# Shaqaysashada

Haddii aad doonayso in aad gasho shaqo mushaar leh, hubi marka hore in aad leedahay xuquuqda shaqo ee Finland. Haddii aad tahay codsade magangelyo, ma noqon kartid ganacsade.

Haddii aad hesho sharciga badbaadada kummeelgaarka ah (tilapäinen suojelu), waxaad xaq u leedahay adeegyada shaqo siinta ee degmada.

Codsadayaasha magangelyada xaq uma lahan adeegyada shaqo siinta ee ay bixiso degmada.

Lagama shaqayn karo shaqada suuqa madow ama sharcidarrada ah (pimeä työ). Shaqada suuqa madow waa shaqo sharcidarro ah, taasoo uu qofku iska daynaayo ama kaga fogaanayo bixinta canshuuraha iyo lacagaha kale ee sharci ahaanta waajibka ah.

**Dhammaan dadka ka shaqeeya Finland waxaa ay leeyihiin shuruudo shaqo oo iskumid ah. Qofka shaqaalaha ah wuxuu xaq u leeyahay arrimaha soo socda:**

- heshiis shaqo iyo shuruudo oo qoraal ah
- mushaar, saacadaha shaqada iyo fasax mushaar leh oo waafaqsan sharciga iyo heshiiska shaqada
- nasashooyin la cayimay inta lagu guda jiro maalinta shaqada
- magdhowga saacadaha dheeraadka ah
- deegaan shaqo oo ammaan ah
- daryeelka caafimaadka shaqada iyo fasax jirro
- tababar iyo hagis ku saabsan arrimaha shaqada (perehdytys)
- xuquuqda ah in uu ku biiri karo ururka shaqaalaha (ammattiliitto)
- fursad uu ugu sheegi karo dhibaatooyinka ka jira goobta shaqada, shaqobixiyaha iyo mas'uulka ammaanka goobta shaqada (työsuojeluviranomainen)



# Hiwaayadaha

Waxaad ka heli doontaa xaruntaada qaabilaadda macluumaad ku saabsan fursadaha hiwaayadaha iyo goobaha ciyaaraha/jimicsiga ee deegaanka.

Qaar ka mid ah xarumaha qaabilaadda waxaa ay leeyihiin qolal ama qalab loogu talagalay jimicsiga, hiwaayadaha ama wakhtiyada firaaqada ah, kuwaas oo aad isticmaali karto.

Haddii loo baahdo, waxaad codsan kartaa lacagta dhammaystiran ee qaabilaadda (täydentävä vastaanottoraha), gaar ahaan haddii ay tahay in lagu bixiyo khidmadaha hiwaayadda carruurta ama qalabka ay u baahan yihiin.

# Qorshaynta dhaqaalaha

Waxaa muhiim ah in aad qorshayso sida aad u isticmaalayso lacagtaada si ay kuugu filnaato. Waa in aad qorshaysaa isticmaalka lacagta, xitaa haddii aad shaqo mushaar leh ka shaqayso.

Go'aanso inta lacag ah ee aad haysato iyo waxyaabaha lagamma- maarmaanka ah ee aad ku bixin doonto. Lacagta u isticmaal si qorshaysan, is barbardhig ku samee qiimaha alaabta aad iibsanayso, ka fiirso in waxa aad  iibsanayso ay yihiin wax aad dhab ahaantii u baahan tahay iyo inkale, ka fiirso ama iska hubi inta lacag ah ee aad haysato iyo muddada ay kugu filnaan karto.

Ka faa'iidayso qiime jebinta iyo qiime dhimista. Alaab badan ayaa fiidkii qiimahooda la dhimaa. Dukaamada waaweyn badanaa way ka raqiisan yihiin kuwa yaryar. Mudnaanta sii calaamadaha ama asnaanta dukaamada.

Iibso alaabaha la soo isticmaalay. Dharka la soo isticmaalay iyo agabka kale waxaad ka heli kartaa iyagoo ah kuwo qiime jaban suuqyada huudheyda ama kudhacda (kirpputori) iyo suuqyada lagu iibiyo alaabaha la soo isticmaalay (kierrätyskeskus).



# Macluumaad dheeraad ah

**Nololmaalmeedka caadiga ah ee xarunta qaabilaadda**
(ku qoran af finnish)
(Migri.fi)

**Xarumaha qaabilaadda qaxootiga**
(ku qoran af finnish)
(Migri.fi)

**Hagahaaga Finland**
(Infofinland.fi)